



Tixraac: XRW/ 0.103 /01/2019

Taariikh: 09/01/2019

Ku: Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta Sare	=Muqdisho=
Ku: Wasiirka Maaliyadda	=Muqdisho=
Ku: Wasiirka Dekadaha iyo Gaadiidka Badda	=Muqdisho=
Ku: Wasiirka Amniga Gudaha	=Muqdisho=
Ku: Wasiirka Gaashaandhigga	=Muqdisho=
Ku: Guddoomiyaha Gobolka Benaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho	=Muqdisho=
Ku: Hanti-dhowraha Guud ee Dowladda	=Muqdisho=
Ku: Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka	=Muqdisho=
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada	=Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya	=Muqdisho=

Ujeedo:- Magacaabid Guddiga Badbaadinta iyo Soo Celinta Hantida Qaranka

Iyadoo laga amba-qaadayo qodobka 99aad xarfaha (a), (b), (e), (f) iyo (i) ee Dastuurka KMG iyo qodobka 100aad xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG, isla markaana la tix-raacayo awaamiirtii iyo talooyinkii uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalku hore u bixiyey, kuna saabsanaa in la dhowro, lana badbaadiyo hantida Qaranka ee ay lahayd Dowladdii dhexe ee Soomaaliya ka hor 1991-kii, ayaa waxa aan magacaabay Guddiga Badbaadinta iyo Soo Celinta Hantida Qaranka oo kala ah:-

1.	Mudane Cabdullaahi Goodax Barre	Wasiirka Waxbarashada Guudomiye
2.	Mudane Cabdiraxmaan Ducaale Beyle	Wasiirka Maaliyadda Xubin
3.	Marwo Maryan Aweys Jaamac	Wasiirka Dekadaha Xubin
4.	Mudane Max'ed Abuukar Islow	Wasiirka Amniga Xubin
5.	Mudane Cabdi Aadan Hoosow	Wasiirka Howlaha Guud/Guriyeynta Xubin
6.	Mudane Cabdi Maxamed Sabriye	Wasiirka Arrimaha Gudaha Xubin
7.	Mudane Salax Axmed Jamaac	Wasiirka Shaqada iyo Shaqalaha Xubin
8.	Mudane Xabdillahi Bidhan Warsame	Wasiirka Kalumeeysiga Xubin
9.	Mudane C/man Cumar Cismaan	Gud. Gobol. Benaadir Xubin
10.	Mudane Max'ed Max'ud Cali	Hanti-dhowraha Guud Xubin
11.	Mudane Axmed Cali Daahir	Xeer-ilaaliyaha Guud Xubin


Soo celinta hantida Qaranka waa in lagu bilaabaa meelaha loo baahan yahay in sida ugu dhaqsaha badan looga fuliyo adeegyada bulshada ama ay Dowladdu doonayso in ay ku shaqayso, haddiise arrinkaasi wax saameyn ah ku yeelanayo dadweynaha waa in xal kale loo helaa.

Sidaa awgeed, waxaa la farayaa dhammaan Wasaaradaha Xukuumadda, Hay'adaha hoos yimaada iyo xafiisyada madaxa-bannaan ee dastuuriga ah in la joojiyey:-

- Bixinta iyo libinta dhulalka Dowladda.
- Lama oran karo waa ka maarannaa dhul Dowladeed. Hay'addii ka maarantana waa in ay keentaa Golaha wasiirada
- Lama kirayn karo dhul Dowladeed, haddii aan loo marin hab-raaca sharciga ah.
- Gaadiidka Dowladda lama wareejin karo.
- Heshiis kasta waa in Xafiiska Garyaqaanka Guud ka talo-bixiyaa, ka dibna Golaha Wasiirrada laga ansixiyaa sida ku cad Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 047.

Xilka iyo Waajibaadka Guddiga

1. Soo tira-koobidda hantida Wasaaradaha, hay'adaha hoos-yimaadaa iyo xafiisyada madaxa-bannaan ee dastuuriga ah ay leeyihiin.
2. Soo Gudbinta xogta iyo soo celinta dhulalka iyo Gaadiidka Dowladda ee sida sharci-darrada ah ay shaqsiyaad si gaara ugu manaafacaadsadaan.
3. U soo gudbinta Ra'iisul Wasaaraha war-bixin tifaf-tiran waqti habboon.


Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda

